Hawshu waa uu sii socday

10. OGOLAANSHAHA Qodobka. 2: Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah ee Bilowga ah

Ka hor inta aan adeegyada la hirgelin markii ugu horreysay, oggolaanshaha waalidka ama mas'uulka ee Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah ee Bilowga ah ayaa loo baahan yahay. Tan badanaa waxaa la heli doonaa dhamaadka kulanka IEP (Individualized Education Program, Barnaamijka Waxbarashada ee La Shakhsi ahaaneeyay) ee hore.

---

11. ADEEGYADA WAA LA FULIYAY

Ardaygu wuxuu bilaabi doonaa inuu helo adeegyada sida ku qeexan IEP-ga.

---

12. KULAMADA IEP EE SANADKA

Kulanka IEP ayaa dhici doona sanad walba. Waalidka ama dugsigu waxay codsan karaan mid dheeraad ah marka loo baahdo. Kulamo dheeri ah oo IEP ah ayaa la qaban doonaa haddii uu jiro beddel meeleyn ah, joojinta adeegyada, ama isbeddellada kale ee IEP ee la taaban karo.

---

13. DIB U QIIMEYNADA

Ardaygaaga waxaa dib loo qiimeyn doonaa hal mar saddexdii sanabo. Waalidiinta ama dugsiyadu waxay codsan karaan dib u qiimayn ka baxsan wakhtigaas. Sababtu waxay noqon kartaa: beddelka qaybta, beddelka meelaynta, ama joojinta adeegyada.

HIGHLINE PUBLIC SCHOOLS

XIGASHOOYINKA:

Buug-gacmeedka Habraaca Waxbarashada Gaarka ah ee Highline Public Schools: https://www.highlineschools.org/departments/special-education/procedural-handbook

Habraaca Ilaalinta Waxbarashada Gaarka ah ee OSPI (Office of Superintendent of Public Instruction):

https://www.k12.wa.us/sites/default/files/public/specialed/pubdocs/ProceduralSafeguards.pdf

HIGHLINE PUBLIC SCHOOLS

HIGHLINE PUBLIC SCHOOLS

Habka Waxbarashada Gaarka ah

Dulmar kooban oo ku saabsan sida ardayga loo gudbiyo, loo qiimeeyo, loo go'aamiyo inuu u qalmo, oo u bilaabo helitaanka adeegyada waxbarashada gaarka ah

HIGHLINE PUBLIC SCHOOLS

Habka Waxbarashada Gaarka ah

1. TIXRAACA-KA HOR

Macallinku wuxuu ururiyaa xogta waxqabadka ardayga; Macallimiinta waxbarashada guud waxa laga yaabaa inay hirgeliyaan xeeladaha waxbaridda fasalka si ay wax uga qabtaan walaacyada.

Haddii xeelado cusub ay si guul leh wax uga qabtaan baahiyaha ardayga, markaas waxaa laga yaabaa inaan loo baahnayn qiimeyn ama adeegyo waxbarasho oo gaar ah.

2. TIXRAAC

Qof kastaa wuxuu arday u diri karaa maamulaha dugsiga. Dugsigu wuxuu leeyahay 25 maalmo ee dugsiyeed si uu u go'aamiyo inay qiimaynayaan ardaygaaga iyo in kale.

Haddaysan ahayn, waa inay si qoraal ah sharaxaad ugu sheegaan waalidka/masuulka.

3. OGOLAANSHAHA Qodobka. 1: in la Qiimeeyo

Dugsigu waxa uu ogolaansho ka heli doonaa waalidka ama masuulka ardayga si uu u sameeyo qiimayn. Haddii ogolaansho la waayo, dugsigu waxa laga yaabaa in uu ogolaansho ka raadsado maxkamadaha iyada oo loo marayo "nidaamka sharciga ah"

4. QIIMEYNTA

Marka ogolaanshaha la helo, qiimaynta waxa fulinaya cilmu-nafsiga dugsiga 35 maalmood gudahood. Ardayga waxa lagu qiimayn doonaa meelo kala duwan waxaana macluumaadka loo ururin doonaa siyaabo kala duwan. Waxaa ka mid ah indho-indheyn iyo qiimeyn, iyo sidoo kale sahanno ay buuxiyeen waalidka/mas'uuliyiinta.

5. GO'AAMI U-QALMITAANKA

Qiimaynta waxaa dib u eegi doona kooxda qiimaynta dugsiga si ay u go'aamiyaan haddii ardaygu u qalmo helida waxbarashada gaarka ah. Si aad xaq ugu yeelato, kooxdu waa inay 'haa' kaga jawaabto dhammaan kuwan soo socda:

1. Naafonima ma jirtaa?

2. Ma jiraan saamayn waxbarasho oo xun?

3. Ma loo baahan yahay tilmaamo si gaar ah loo habeeyay?

Haddii ardaygu UUSAN u qalmin, wax adeeg waxbarasho gaar ah lama siin doono.

6. KULANKA QIIMEYNTA NATIIJADA

Kooxda dugsigu waxay la kulmi doonaan qoyska si ay ugala hadlaan natiijada qiimaynta. Waxay ku wargelin doonaan haddii ilmahaagu u qalmo ama aanu u qalmin adeegyada waxbarashada gaarka ah. Haddii ay u qalanto, kooxdu waxay haysataa 30 maalmood laga bilaabo helitaanka natiijooyinka si ay u horumariyaan IEP.

7. KULANKA IEP EE HOREEYA

Waalidiinta iyo qoysasku waa xubno muhiim ah oo ka tirsan kooxda IEP, taladoodana waa muhiim. Waxaa lagugu martiqaadi doona kulanka IEP. Dukumeentiga IEP waxa uu faahfaahinaya tilmaamaha sida gaarka ah loo qaabeeyey iyo adeegyada/taageerada kale ee uu ilmahaagu heli doono. Kulanka IEP waa meel la iska kaashado laguna wadaago faahfaahinta IEP.

8. KOOXDA KULANKA IEP:

- Waalidka ama masuulka

- Ardayga, sida ku habboon

- Maareeyaha Kiiska ee IEP

- Macalinka Waxbarashada Gaarka ah

- Macalinka Waxbarashada Guud

-Wakiilka LEA (Local Education Agency, Wakaalada Waxbarashada Maxalliga ah) (maamulaha ama shaqaalaha kale ee degmada)

-Shaqaalaha kale ee adeega la xidhiidha:

  - Dabiibabaha Dhibaatooyinka Ka Imaadaan Hawl-maalmeedyada (Occupational Therapist)

  - Dhakhtarka Hadalka/Luuqada

  - Dabiibaha Jidhka

  - Turjubaan, haddii loo baahdo

- Qof kasta oo taageera qoysku wuu martiqaadi karaa (Taageraha qoyska, qareen, xubin qoyska ah, ama saaxiib)

- Dhaktarka Cilmi-nafsiga Dugsiga, marka qiimaynta ama dib u qiimaynta laga hadlayo

9. MEELAYNTA ARDAYGA

Sida ardaygu u helo waxbariddooda gaarka ah ayaa lagu go'aamiyaa kulanka IEP iyadoo lagu salaynayo natiijooyinka qiimaynta. Waxa lagu meelayn doonaa Deegaanka Ugu yara Xaddidan(Least Restrictive Environment, LRE) iyadoo loo eegayo baahiyahooda shaqsiyeed. Tani waxay sare u qaadaysaa fursadaha ardayda si ay u gaadhaan hadafyadooda iyo ujeedooyinkooda.

LRE ardaygu waxa laga yaabaa in uu ku dhex jiro fasalka waxbarashada guud, oo leh adeegyada IEP oo lagu daray maalintii oo dhan. Si kasta oo loo maareeyo LRE, adeegyada ardayga waxaa maamula macalinka Waxbarashada Gaarka ah.